



BAAQ NABADEED KA YIMID HAWEENKA SOOMAALIYEED

Muqdisho

Nofeembar 27, 2024

Ku: Golaha Wadatashiga Qaran

Ujeeddo: Xal u Helidda Qilaafka Siyasadeed ee Dalka ka Taagan

Mudanayaal, Somali Gender Equity Movement (SGEM) Guddigeeda Maareynta iyo xubnaheeda oo ka kooban ku dhawaad 8,000 oo ah haween Soomaaliyeed, waxay aad uga walaacsan yihiin qilaafka siyaasadeed iyo marxaladaha cakiran ee uu dalku galay kuwaas oo keeni kara colaad iyo dib u dhac dawladnimadii mudada dheer laga soo shaqeynayey. Waxaa waajib naga saran yahay in aan door muhiim ah ka qaadano qaabeynta mustaqbalka qarankeena, nabadda, iyo dhab-u-heshiin.

Waxaan si xushmad leh uga codsaneynaa hogaamiyayaasha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha xubnaha ka ah in ay ka wada shaqeyaan sidii xal nabadeed loogu heli lahaa qilaafka siyasadeed ee dalka ka jira oo aan looga sii darin xaaladda taagan. Waxaan ku boorineynaa hogaamiyayaasha dalka in ay ka shaqeyaan siyaasad heshiis lagu yahay, nabadda, xasiloonaada iyo guud ahaanba masiirka dalka iyo dadka.

Sidoo kale, waxaan ugu baaqeynaa waxgaradka iyo aqoonyahannada Soomaaliyeed in aysan daawan qilaafka siyaadeed ee dalka qatar weyn gelin kara isla markaasna aysan la kala safan dhinacyada is haya. Waxaan amiinsan nahay in dhamaanteen mas'uliyad naga saran tahay in aan ka shaqeyno sidii loo xallin lahaa qilaafka siyasadeed ee taagan iyo sidii dalka xasiiloonaada siyasadeed loogu heli lahaa.

Waxaan soo jeedineynaa in guddi dhexdhexaad ah oo ka kooban bulshada qaybaheeda kala duwan haweenkuna ay tiir dhexaad u yihiin oo ka shaqeeya sidii qilaafkaan tagan loo soo afjari lahaa.

Mudanayaal, qarankeenna wuxuu soo maray colaado iyo dhibaatooyin fara badan, mana awoodno in kala duwanaanshaha siyaasadeed ay mar kale na burburiso ama dib u dhac nagu rido. Waxaa haweenka Soomaliyeed ka go'an in ay door firfircoon ka qaataan geedi socodka siyaasadeed ee heer federaal iyo mid dowlad goboleed, waxaan ku boorineynaa dhamaan hogaamiyayaasha dalka iyo siyaasiyiintaba inay ka shaqeeyaan midnimo iyo wada shaqeyn buuxda.

WAXAAN QARANKA KU WADA DHISI KARNAA ANADOO WADA JIRNA.

Wa Billahu Tawfiiq.